

# Hagaha Isticmaalayaasha ku Haga Weeraha Muhiimka ah

QEEXIDDA WEERAHA CAYMISKA CAAFIMAADKA EE UGU SARREEYA



# lacagaha caymiska laga jari karo

Qaddarka lacageed ee aad ku bixin doonto daryeelkaaga caafimaad ka hor inta qorshahaaga caafimaadka uusan bilaabin bixinta qaar ka mid ah kharashaadka daryeelkaaga caafimaad. Lacagaha caymiska laga jari karo waa mid ka mid ah siyaabaha aad ku wadaagto kharashka daryeelkaaga ee qorshahaaga caafimaadka.



Qaddarka lacagahaaga caymiska laga jari karo ayaa wuxuu bilaabanayaa bilowga sannad kaalandar kasta.

## SIDA UU U SHAQEYO

Marcus wuxuu leeyahay lacagaha caymiska laga jari karo oo \$2,000 ah sannadkii. Wuxuu ku jiray cusbitaal kharashaadkiisa dhan \$10,000. Marcus waa in uu bixiyaa lacagahiisa caymis laga jari karo kahor inta qorshahiisa caafimaadka uusan bixin wax ka mid ah kharashaadkiisa.

Lacagaha caymiska laga jari karo iyo kharashaadka kale waa kuwo ku kala duwan yihiin qorshaha caafimaadka.



$$\$10,000 - \$2,000 = \$8,000$$

JOOGITA  
ANKA  
CUSBITA  
ALKA

LACAGTA  
CAYMISKA  
LAGA JARI  
KARO EE UU  
BIXIYEY  
MARCUS

QAYB AMA  
DHAMMAAN  
WAXAA  
BIXIYAY  
QORSHAHA  
CAAFIGAADKA

# Liiska daawooyinka ee qorshaha

Liiska daawooyinka ee qorshaha waa liiska daawooyinka ee uu caymiyay qorshahaaga caafimaadka. Qorshahaaga caafimaadka ayaa bixin doonna dhammaan ama qayb ka mid ah kharashaadka daawooyinkan.



## SIDA UU U SHAQEEYO

George ayaa wuxuu tagayaa farmashiyaha si uu u soo buuxiyo riijeeto cusub. George ayaa farmashiilaha tusinaya liiska daawooyinka ee qorshaha si uu u eego. Qorshahiisa caafimaadka ayaa bixin doona kharashka daawada. George ayaa keliya bixinaya \$20 oo ah lacag-bixintiisa caymiska ee la wadaago. Qorshahiisa ayaa inta dhiman bixinaya.

Qaddarka lacag-bixinta caymiska ee la wadaago ayaa ku kala duwan qorshaha caafimaadka.



# bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP)

Takhtarka ama kalkaaliyaha caafimaad ee aasaasiga ah ee aad dooratay in aad u booqato sida qayb ka mid ah qorshahaaga caafimaad.

Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah ayaa la soconaya daryeelka caafimaadkaaga guud waxaanna laga yaabaa in uu la shaqeeyo daryeel bixiyeyaasha kale iyo takhasuslayaal si loo ilaaliyo caafimaadqabkaaga.



## SIDA UU U SHAQEEO

Roger ayaa markii ugu horreysay yeeshay qorshe caafimaad. Markii hore, wuxuu tagi jiray qolka xaaladaha degdegga ah haddii uu dareemo xanuun. Hadda wuxuu dooran karaa bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP).

Bixiyahiisa daryeelka aasaasiga ah (PCP) waa takhtarkiisa aasaasiga ah.



BOOQO BIXIYAHAAGA DARYEELKA AASAASIGA AH (PCP) SI AAD U HESHO BAARITAANNO CAAFIMAAD, DARYEELKA AAN DEGDEGGA AHAYN, IYO DARYEELKA MEEL FOG LAGA BIXIYO

# canshuur dhaafka lacagta joogtada ah ee caymiska


Iyada oo ku xiran dakhligaaga, waxaad xaq u yeellan kartaa in aad hesho canshuur dhaafka lacagta joogtada ah ee caymiska. Canshuur dhaafka ayaa loo isticmaali karaa in lagu yareeyo lacagtaada caymiska joogtada ah, qaddarka lacagta aad bixiso bil kasta ee loogu talagalay qorshahaaga caafimaadka.

Si aad u oggaato haddii aad awooddo in aad hesho canshuur dhaafka booqo wahealthplanfinder.org, ama ka wac Xarunteenna Taageerada Macmiilka 1-855-923-4633, ama la xiriir hagaha ama dallaalka degaankaaga.



## SIDA UU U SHAQEEYO

Marcela waa qof doob ah, oo aan caymis ku jirin. Waxay sameysaa \$25,000 sannadkii (ku dhowaad \$2,000 bishii). Kasbashada Marcela ayaanan u suuragelin in ay hesho caawimaad maaliyadeed ee loo yaqaanno canshuur dhaaf. Caawimaaddan ayaa ka dhigta lacag-bixinnada lacagta joogtada ah ee caymiska mid qiimaheedu yar yahay.



La xiriir *Washington Healthplanfinder* si aad u hesho lambarrada dhabta ah.

QIIMAHA  
LACAGTA  
JOOGTADA  
AH EE  
CAYMISKA

CANSHUUR  
DHAAFKA  
LACAGTA  
JOOGTADA  
AH A EE  
CAYMISKA

LACAG-  
BIXINNADA  
BILAHA AH  
EE  
HOOSEEYA

# caymiska-la-wadaago


Caymiska-la-wadaago waa saamigaaga ee kharashka adeegga daryeelka caafimaadka ee la caymiyay. Waxaad bilaabi doontaa in aad bixiso lacagaha caymiska la wadaago ka-dib marka aad bixiso lacagaha caymiska laga jari karo ee qorshahaaga caafimaadka.

Caymiska-la-wadaago waa mid ka mid ah siyaabaha aad kula wadaagto kharashka daryeelkaaga caafimaad qorshahaaga caafimaadka.



## SIDA UU U SHAQEEYO

James wuxuu bixiyay lacag caymiska laga jari karo ee qorshahiisa caafimaadka. Wuxuu helaa qaansheeg \$500 doolar ah oo loogu talagalay baaritaan caafimaad. Qorshahiisa caafimaadka ayaa bixin doonna 80% ee qaansheegga ama \$400 doolar. Sida qayb ka mid ah caymiskiisa la wadaago James ayaa bixin doonna 20% ee qaansheegga ama \$100 doolar.



Qaddarka caymiska la wadaago wuxuu ku kala duwan yahay qorshaha caafimaadka.

20% x \$500  
CAYMISLA-LA-  
WADAAGO

WADARTA  
GUUD EE  
QAANSHE  
EGGA

= \$100  
JAMES LAGA RABO

# lacagaha caymiska ee joogtada ah

Lacagta joogtada ah ee caymiskaaga waa qaddarka lacagta ah ee aad bil kasta bixiso ee loogu talagalay qorshahaaga caafimaadka. Waa in aad bixisaa lacagahaaga caymiska joogtada ah xitaa haddii aadan qaadan wax adeeg daryeel caafimaad ah.

Kala xiriir shirkadda caymiska caafimaadkaaga su'aal kasta oo lacag-bixin ku saabsan.



## SIDA UU U SHAQEEYO

Sida biilkeeda korontada ama taleefoonka, Jean ayaa bixisa lacagteeda caymiska qorshaha caafimaadka bil kasta. Si loo habsado in lacag-bixinteeda lagu helay waqtigii loogu talagalay, Jean waxay boostada ku direysaa lacag-bixinteeda maalmo yar ka hor ama waxay ku bixisaa tooska internetka si ay uga dhigto qorshaheeda caafimaadka mid shaqeeya.



U OGOLOOW WAQTI LACAG-BIXINADA  
ADIGA OO BOOSTADA KU DIRAYA WAQTI  
HORE

# lacagta-jeebka-laga-bixiyo

Kharashaadka aad bixiso kuwaasi oo aanan bixin qorshahaaga caafimaadka.

Kharashaadka lacagta-jeebka-laga-bixiyo waxaa ku jira lacagaha caymiska laga jari karo, caymiska-la-wadaago, iyo lacag-bixinnada caymiska la wadaago ee adeegyada la caymiyay oo lagu daray dhammaan kharashaadyada loogu talagalay adeegyada uusan caymin qorshahaaga caafimaadka.



Kharashaadka lacagta-jeebka-laga-bixiyo ee loogu talagalay sannadka 2015 waxay noqon karaan wax aan ka badnayn \$6,600 ee loogu talagalay qorshaha shakhsiga iyo \$13,200 ee loogu talagalay qorshaha qoyska haddii aad ka soo iibsatid gudaha goobta suuqa.

## SIDA UU U SHAQEYO

Shirley waxay leedahay laba caruurood. Waxay bixinaysaa \$20 doolar oo ah lacag-bixinta caymiska ee la wadaago waqti kasta ee iyada ama carruurta kale ay yeeshaan booqashada takhtarka ee caadiga ah. Sida qoys ahaan, waxay takhtarka la yeellan doonnaan 15 booqasho sannadkan. Kharasha ay Shirleyjeebkeeda ka bixiso ee loogu talagalay lacag-bixinnada caymiska ee la wadaago waa \$300 sannadkan.



Lambarrada waa qiyaaso; wac qorshahaaga caafimaadka gaarka ah si aad uga hesho faahfaahin dheeri ah.

**\$20**  
BOOQASHO  
KASTA

**x 15**  
BOOQASH  
OOYINKA

**= \$300**  
SANNADKA



# shabakada


## GUDAHA-SHABAKADA:

Takhaatiirta iyo bixiyayaasha kale ee daryeelka caafimaadka ee uu oggolaaday qorshahaaga caafimaadka.

## DIBEDDA-SHABAKADA:

Takhaatiirta iyo bixiyayaasha kale ee daryeelka caafimaadka ee uusan oggolaan qorshahaaga caafimaadka.

Waxaad lacag badan ku bixin doontaa adeegyada aad ka hesho bixiyayaasha dibedda-shabakada.



## SIDA UU U SHAQEÉYO

Laura waxay doonaysaa in ay aragto la-taliyaha caafimaad dhimirka. Waxay heshay mid u dhow gurigeeda. Kahor inta aysan sameysan jadwal booqasho ka sameysan, waxay hubsanaysaa in daryeel bixiyaha uu ku jiro gudaha-shabakada loogu talagalay qorshaheeda caafimaadka. Kharashka Laura wuxuu noqon doonaa mid badan haddii ay doorato lataliye dibedda-shabakada ah.



WEYDII HADDII DARYEEL  
BIXIYAHAAGUU UU  
YAHAY MID KU JIRA  
GUDAHA-SHABAKADA KA  
HOR INTA AADAN KA  
SAMAYSAN BALLAN  
BOOQASHO

# lacag-bixinta caymiska ee la wadaago

Lacag-bixinta caymiska ee la wadaago waad qaddar go'an oo aad ku bixinayso adeegga daryeelka caafimaad ee la caymiyay. Adeegyada sida booqashada takhtarka ee caadiga ah ama buuxinta rijeetada ayaa caadi ahaan leh lacag-bixin caymis oo la wadaago.

Lacag-bixinta caymiskaaga ee la wadaago ayaa waxaa la filayaa waqtiga aad adeegga hesho.



## SIDA UU U SHAQEYO

Thomas wuxuu qabaa dhiig-kar ama caddaadiska dhiigga oo sarreeya wuxuuna booqdaa takhtarkiisa daryeelka aasaasiga ah 3 bilood kasta. Qorshahiisa caafimaadka ayaa u yeeraya lacag-bixinta caymiska la wadaago oo \$20 ee loogu talagalay booqashooyinka takhtarka. Thomas ayaa bixiya lacag-bixinta caymiska la wadaago ee booqasho kasta ee takhtarka ee daryeelka.

Qaddarka lacag-bixinta caymiska ee la wadaago ayaa ku kala duwan qorshaha caafimaadka.



**\$20**  
BOOQASHO KASTA

# ► adeegyada ka hortagga

Adeegyada daryeelka caafimaadka, sida baaritaanada caafimaadka ee sannadlaha iyo tallaalada ifilada, ee uu bixiyo qorshahaaga caymiska caafimaadka oo waxyar kuugu fadhiya ama bilaashka kuu ah. Adeegyadan ayaa kaliya la caymiyaa marka uu bixiyo adeeg bixiye ku jira gudaha-shabakada.



## SIDA UU U SHAQEEYO

Taylor ayaa doonaysa in ay caafimaadqabtaan, sidaa awgeed waxay qaataan baaritaan caafimaad iyo tallaal ifilo sannad kasta. Taylor ayaa jecel in qorshahooda caafimaadka uu bixiyo lacagta adeegyada ka ilaalinaya in ay xanuunsadaan.



ADEEGYADA KA  
HORTAGGA WAXAY  
KUGU CAAWINAYAAN IN  
AAD CAAFIMAAD QABTO

# dheefaha caafimaadka aasaasiga ah



10 Adeegyada daryeelka caafimaad ah oo isku xiran oo ay tahay qorshayaasha oo dhan in ay caymiyaan. Dheefaha qaar waa kuwo lacag la'aan ah. Qaarkood waxaa laga yaabaa in ay leeyihiin lacag-bixinnada caymiska ee la wadaago iyo caymiska-la-wadaago.

1. Booqashooyinka takhtarka iyo joogitaanka cusbitaalka
2. Safarada lagu tago qolka xaaladaha degdegga ah
3. Daryeel ka hor iyo kadib marka uu ilmahaaga dhasho
4. Adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta isticmaalka maandooriyaha
5. Daawooyinka la isku qoro

6. Adeegyada iyo aaladaha kugu caawinaya in aad bogsato haddii uu dhaawac ku soo gaaro, ama aad leedahay xaalad naafonimo ama raagta
7. Baaritaannada shaybaarka
8. Adeegyada ka hortagga oo ay ku jiraan la-talinta, baaritaannada iyo tallaalka
9. Maareynta cudurka raaga, sida cudurrada sonkorowga ama neefta
10. Daryeelka takhtarka carruurta

## SIDA UU U SHAQEËYO

Hadda dhammaan qorshayaasha caafimaadka waa in ay ku jiraan dheefaha cusbitaal dhigista. Haddii aad rabto faahfaahin ka wac Washington Healthplanfinder lambarkan 1-855-WAFINDER (1-855-923-4633) ama wac qorshahaaga caafimaadka



CAAWIMO KA HEL KHUBARRO  
WANAAGSAN

The Washington Health Benefit Exchange wuxuu u hoggaansamayaa sharciyada xuquuqaha madaniga ah ee Federaalka ee ku habboon dadkana kula ma kaco takoor ku saleysan firkooda, midabkooda, asal ahaan dalka ay ka soo jeedaa, da'dooda, naafonimadooda, ama jinsigooda.

ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 1-855-923-4633 (TTY: 1-855-627-9604).

注意：如果您使用繁體中文，您可以免費獲得語言援助服務。請致電 1-855-923-4633 (TTY: 1-855-627-9604)。

[wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org) 1-855-WAFINDER 1-855-923-4633

